# Macluumaad ku aaddan SNQ –Diiwaanka tayada ee Swiidhishka ee dhiciska iyo carruurta iyadoo xanuunsan dhalata

## Kugu socota adigaaga leh canug lagu daryeelayo qeybta dhiciska iyo carruurta iyadoo xanuunsan dhalata

Daryeelka swiidhishka ee dhiciska iyo carruurta iyadoo xanuunsan dhalata wuxuu ka mid yahay kuwa ugu fiican caalamka, laakiin daryeelka iyo natiijada weli waa la sii hagaajin karaa. Diiwaanka tayada ee Swiidhishka ee dhiciska iyo carruurta iyadoo xanuunsan dhalata (SNQ) waa diiwaan qaran oo loogu tala galay tayada daryeelka carruurta mar dhaw dhalatay. Hadafka laga leeyahay SNQ waa in tayada daryeelka la hormariyo, lagana dhigo mid huban. Qeybaha dhiciska iyo carruurta iyadoo xanuunsan dhalata ee ku yaalla Swiidhan dhammaantood waxay doorteen in ay SNQ u soo gudbiyaan macluumaadka carruurta lagu daryeelayo qeybta dhiciska iyo carruurta iyadoo xanuunsan dhalata. Inta daryeelku socdo waxaa dhaceysa in macluumaad xaddidan oo ku aaddan uurka iyo dhalidda, iyo xaaladda canuggaaga, daweyntiisa iyo baaritaanno wax looga qiyaas qaato loo soo gudbinayo SNQ. Xagga carruurta u baahan daryeelka aadka u ballaaran waxaa xitaa warbixinnada SNQ looga soo gudbinayaa dib u booqashooyinka xaalad la socoshada ku aaddan.

## Waxaad gacan ka geysaneysaa daryeel sida iminka fiican

In uu wax uga jiryo diiwaanka tayada ee qaranka wuxuu canuggaagu gacan uga geysanayaa sii hagaajinta daryeelka. Mar kasta oo ay dad badan ka qeyb qaataan, waa marka uu daryeelku sii sugnaanayo oo uu wax ku ool sii noqonayo. Macluumaadka SNQ waxaa loo isticmaalayaa shaqada wax sii hagaajinta, iyadoo la kaashanayo macluumaadka diiwaanka ku jirana waxaannu heleynaa fursado aaney jirin kuwo la mid ah si aannu u aragno qaababka shaqo iyo daweyn, dawada iyo waxyaabaha natiijo fiican canuggaaga ka bukaan ahaan gaarsiin kara. Ka qeyb qaadashadu waa mid iskaa iyo haddii aad doontid ah.

## Sidan ayaa loo maareynayaa macluumaadka canuggaaga

Macluumaad ayaa adiga ka waalid ahaan iyo feylka macluumaadka caafimaadka ee canuggaaga laga soo ururinayaa. Macluumaad go’an oo feylka macluumaadka dhalmada ee hooyada ku jira ayaa sidoo kale SNQ ku jiraya. Si aannu u helno macluumaad ku aaddan sida uu u shaqeeyo daryeelka dhiciska iyo carruurta iyadoo bukta dhalata iyo daryeelka caafimaadka waxaa lagu weydiisan karaa in aad buuxisid foom ra’yi baaris oo gaar ah. Macluumaadka waxaa loo adeegsan karaa oo keliya si tayada daryeelka loo hormariyo, loogana dhigo mid huban, in tira koob la soo saaro iyo in cilmi baaris lugu sameeyo daryeelka caafimaadka iyo bukaanka.

Macluumaadka waxaa xitaa, ka dib marka lagu sameeyo eegitaan xagga sir qariska ah, loo gudbin karaa qof macluumaadka u isticmaalaya wax ka mid seddaxdaas ula jeeddo.

Haddii laga yaabo in SNQ ay macluumaad dhiibto waxay taasi u dhici kartaa si elekteroonig ah. Marka macluumaadka ku jira SNQ loo isticmaalayo diraasad cilmi baaris ah waxaa mar walba leysaga baahanyahay oggolaasho ka timid guddiga eegitaanka anshaxa (EPN).

## Sir

Macluumaadka canuggaagu soo gelayaan sir-qarinta si waafaqsan. Taasi waxay muhiimad ahaan ka dhigantahay in macluumaadka canuggaaga ay SNQ gudbin karto oo keliya haddii ay caddahay in canuggaaga ama cid xigto ah aysan wax waxyeello ah macluumaadka la gudbiyay ka soo gaareynin. Wax macluumaad ah oo la gudbiyay lagama garan karo mucayan ah. Macluumaad leysu ururiyay oo keliya ayaa la is tusayaa.

## Ammaan

Macluumaadka canuggaaga waa laga ilaalinayaa cid aan ehel u ahayn. Waxaa jira shuruudo gaar ah oo tusaale ahaan ka dhigan in cidda u baahan macluumaadka oo keliya ay fursad u heli karto, iyo in la hubinayo in aysan macluumaadka helin cid aan ehel u ahayn, in macluumaadka la ilaaliyo iyadoo la maldahayo in u gelitaanka macluumaadku ay u dhaceyso oo keliya si la hubo.

## Heli karid

Daryeel siiyayaasha canuggaagu wax wey ka heli karaan macluumaadka ay iyagu SNQ u soo gudbiyeen. Cid kale oo daryeel bixiye ah ma heli karto macluumaadkaas iyaga ah. Kuwa muhiimad ahaan maareynaya SNQ wey kari karaan waaney u furantahay in ay macluumaadkaas helaan.

## Ka takhallusid

Macluumaadka canuggaaga waa la tuurayaa haddii aan weli loogu sii baahneyn in daryeelka la hormariyo, tayadiisana laga dhigo mid la hubo.

## Xuquuqda canuggaaga

- Ka qeyb qaadashada SNQ ee canuggaagu waa wax iskaa iyo haddii aad doontid ah, mana saameyneyso daryeelka uu canuggaagu helayo. Haddii aadan dooneyn in canuggaaga macluumaadkiisa la diiwaangeliyo, la xiriir dhakhtar bukaanka mas'uulka ka ah.
- Goor kasta oo ay noqotaba waxaad xaq u leedahay in macluumaadka canuggaaga laga tirtiro SNQ.
- Waad heli kartaa macluumaad ku aaddan qeybta caafimaadka iyo waqtiga ay cidi macluumaadka canuggaaga wax ka heshay.
- Waxaad xaq u leedahay in aad megdhaw heshid haddii macluumaadka canuggaaga loo maareeyo si jebineysa xeerar macluumaadka shakhsiga ah.
- Waad dalban kartaa in la saxo haddii aan macluumaadka canuggaaga loo maareyn si waafaqsan xeerka macluumaadka shakhsiga ah.
- Waxaad, si lacag la'aan, hal mar sannadkiiba xaq ugu leedahay in aad ogaatid macluumaadka canuggaaga laga diiwaan geliyay kuwa ay yihiin (wax diiwaanka laga soo saaray). Dalbasho nuucan ah waxay u dhacayaa si qoraal ah oo saxiixan, waxaana loo dirayaa qofka lagala xiriiro SNQ. Cinwaanka qofka lala xiriirayo wuxuu ku jiryaa www.snq.se.

## Mas'uulka macluumaadka shakhsiga ah

Hey'ad diiwaan-gelin-tayo oo kasta waxay leedahay hey'ad dhexo oo mas'uul ka ah macluumaadka shakhsiga ah, badanaane waa maamul gobaleed. Marka laga hadlayo SNQ waxaa mas'uuliyaddaas iska leh maamul gobaleedka Västerbotten. Haddii aad dooneysid in

aad heshid macluumaad dheeraad ah waxaad la xiriiri kartaa dhakhtarka canuggaaga ama wax dheeraad ah ayaad ka akhrisan kartaa bogga intarneetka ee **www.snq.se**.

Xagga diiwaanka tayada ee

***Swiidhishka ee dhiciska iyo carruurta xanuunka ku dhalata waa***

**Mikael Norman**
Enheten för Pediatrik, CLINTEC
Blickagången 6A
Karolinska Institutet & Karolinska Universitetssjukhuset
141 57 Stockholm
SWEDEN